

# Korona: Waa muhiim in si sax ah loo nadiifiyo

Ann-Elisabet Sandvold waxeey kasoo shaqeysay dhaqmada waxayna ahayd hogaamiyaha koorsooyinka/ tabbare sanado badan. Waxeey leedahay aad beey muhiim utahay in shaqaalaha nadaafada ay yihiin kuwo aqoon leh oo tababaran. Weey garanayaan sideey ujojin lahaayeen faafitaanka.

**Ola Tømmerås, Fagbladet**



Waa muhiim in si sax ah loo dhaqo si loo joojiyo caabuqa. Sidaad daraadeed waa ineey xaruma bukaanka iyo kuwa kaleba ay helaan shaqaale nadaafadeed oo aqoon leh. Waxaa yiri Ann-Elisabet Sandvold ee Ururada shaqaalaha (Fagforbundet).

## In badan baa aaminsan ineey kari karaan

– In badan baa leh waan garanaynaa dhaqmada. Laakin marwalba run ma ahan. Waa in aan si sax ah unadiifinaa si aan ujojin faafintaanka. Hadii aan umaleeyno in virus ama caabuq ku dhexjiro qol, waxaa qasab ah inaan si quman oo isdabotaa ah udhaqnaa. Hadii aan qalad sameeyno, waan faafin karnaa caabuqa halkii aan joojin lahayn, ayeey tiri Sandvold.

Sandvold waxeey sheegaysaa in shaqaalaha nadaafada ee tababaran ay garanayaa qaabkeey ujojin karaan faafitaanka qol dhexdiis.

– Shaqaalaha nadaafadu weey dhaqayaan meelaha la taabtay oo dhan. Waxeey isticmaalayaan dharka ka hortaga waxeeyna si sax ah utuurayaan qalabka halka mar la isticmaalo.

## Shaqaalaha nadaafadu waa ineey helaan macluumaad

– Shaqaalaha nadaafadu waa ineey ka helaan macluumaadka loo baahanyahay dhakhaatiirta iyo kalkaalisoo-yinkaba. Waa in lala socodsiiyo hadii eey khatar jirto in caabuqa qol ku jiro.

Mette Sætervold waa madaxa nadaafada ee isbitaalka St. Olav. Waxeey sheegaysaa in macluumaadka ama warbixinada isbitaalku eey wa-naagsanyihiin.

– Jadwalka maalinta ee shaqaalaha nadaafada isbitaalka St. Olav si caadi ah ayuu usocdaa. Waxaan leenahay sharciyo wixii aan samayn lahayn hadii uu yimaado caabuqa koroona ama faafitaan kale, waxeey kusoo qortay e-post.

## Shaqaalaha nadaafadu waa ineey helaan fariin

Laakiin waxaa kala duwan cadadka macluumaadka eey helaan shaqaalaha nadaafada, saas waxaa tiri Ann-Elisabet Sandvold ee ururada shaqaalaha (Fagforbundet).

– Ma dhacdo marwalba in shaqaalaha xarunta bukaanka ama meelaha kale, eey ku fikiraan in eey qasab tahay in shaqaalaha nadaafadu soo galaan, ama eey is leeyihiin dib baa loo dhigi karaa. Laakiin waa ineey isla markiibaa sheegaan, oo ay ahaadaan shaqaale nadaafadeed oo shqada-dooda qabanaya, ayeey tiri.

## Waxaa machadka caafimaadka dadweeynaha kasoo baxay tilmaahaan

## waxbaridda ee shaqaalaha nadaafada:

- Qalabka halka mar la ismicalay waxaad ku tuuraysaa bac xiran oo lugu rido qashinka aan dib loo isticmaali karin (restavfall).

- Wixii uu taabtay bukaanku waa ka dileeysaa jeermiska tusaale kuraasta, gacanka albaabka, musqusha iwl.

- Dhaqmada kale si caadi ah ayaad u sameeynaysaa.

- Waxaad ka saaraysaa wasaqdii muuqata adigoo isticmaalaya maro wax dhuuqda ama jiida (Cellestoff) Kadibna waxaad sameeynaysaa jeermis dilis meeshaasoo dhan.

- Caabuqu uma adkaysan karo kulayl badan ama daawooyinka jeermis dilista sida Virkon, Perasafe iyo aalkolo. Kolorinta guryaha waad isticmaali kartaa. Laakiin waa inuusan qaskeedu ka yaraan 1000 ppm.

Oversatt til somali av Farhiya Ali

Grafisk designer: Aniabell Valdes Ochoa

Av Norsk Folkehjelp Oslo, OASEN Kvinner Krysser Grenser



NORSK FOLKEHJELP  
OSLO



INTEGRERING- OG  
MANGFOLDSDIREKTORATET

